



**Dheeraad Tirada 4:Buug warbixineed ku socda codsadyaasha  
Ilaalinta caalamiga ah (IPO 1)**

**Ogaysiis Ama Wargalin:**

**Warbixin la xiriirta xiliyeynta dib u noqoshada ee mamnuuca ah iyadoo la tix galinayo Qeybta 50aad ee xeerka ilaalinta caalamiga ah 2015.**

**Laga bilaabo kowda Janaayo 2020**, codsadyaasha ilaalinta caalamiga ah ee cusub,qaybta 50(dib u noqoshada mamnuuca ah) tix gelinta kaliya ee la qaadan doono waa inay noqotaa mid waafaqsan shuruudaha uu dhigayo qodobka 51(1)(a)ku(c)ee xeerka 2015 taasoo noqonaysa mid lagu dabaqi karo qofka.sida.Marka wasiirku-

(a)Wasiirku uu diiday qeybta hoose ee qodobka 47 Labadaba oo ah cadeynta qaxoontinimo iyo in la siiyo ilaalin qofka iyo

(b)Uu ku qancay in qeybta 48(5) in aan lagu dabaqi karin ama aanay khuseyn qofka,iyo

(c)Uu diiday sida uu dhigayo qeybta hoose ee 49(4)oo ah in qofka la siiyo ogolaanshiyo qeybtaas hoose.

Wasiirku mar dambe ma sameyn doono ra,yi ama aragti oo ku aadan dib u noqoshada mamnuuca ah ee qeybta hoose ee 50 marka uu tixgelinayo in la siiyo codsadhaha ogolaanshiyo uu ku joogayo ee qeybta hoose ee 49.

Arintan la xiriirta,hadii tixgelinta qaybta 50 aad lagu soo dhamaystiro in qeybta 50(1) Lagu dabaqi karo,waraaq ayaa loo diri doonaa oo lagu wargalinayo iyaga in la siiyey ogolaanshiyo ay ku joogaan ee qeybta hoose ee 50(4).siday ahaataba,hadii tixgalinta qeybta 50 aad lagu soo dhamaystiro in qeybta 50(1) aan lagu dabaqi karin,waxa loo diri doonaa qofka warbixin ku saabsan qeybta 50 aad iyo ogaysiin ah amar masaafurin sida uu dhigayo qeybta 51 aad(3) ee xeerka 2015.